

**Foomka Ogolaanshaha ee Telefoonka Gacanta**  
(Mobile Phone Consent Form – Somali)

**Fadlan Dooro Mid:**

- Haa**, waxaan u fasaxay Isbitaalka Carruurta iyo rugaha caafimaad ee Minnesota (Children's Hospitals and Clinics of Minnesota) iyo xulufadooda ama qandaraaslayaashooda inay wici karaan telefoonkayga ku jira faylalka isbitaalka carruurta ee Children's si ay igala hadlaan arrimahayga ku saabsan daryeelka, daawaynta, adeegyada iyo xisaabaadka iyagoo isticmaalaya farriimaha codadka ah ee horay loo duubay, ama nidaamka telefoonnada ee iskood isku dira amase farriimaha qoraallada ah.
- Maya**, uma fasaxayo Isbitaalka Children's ee Minnesota iyo xulufadiisa ama qandaraaslayaashiisa inay iga soo wacaan telefoonkayga gacanta arrimo ku saabsan daryeelkayga iyo xisaabaadkayga iyaga oo isticmaalaya farriimo horay loo duubay, ama nidaamka telefoonnada ee iskood isku dira amase farriimaha qoraalka ah.

**Waan fahmay waana aqbalay mid kasta oo ka mid ah waxyaalaha soo socda:**

- **Kharashaadka.** Shirkadda telefoonkayga ama intarnetkayga waxaa laga yaabaa inay igu dallacdo qiimo lacageed (farriintiiba ama daqiiqaddiiba ah) si farriimaha aan uga helo Isbitaalka Carruurta ee Children's.
- **Asturnaanta iyo Ilaalinta Macluumaadka Caafimaad.** Helitaanka farriimaha codka iyo qoraalka ah ee aad ka hesho Isbitaalka Children's waxaa laga yaabaa inay saamayn ku yeelato asturnaanta iyo badbaadada Macluumaadka Caafimaad ee la dhawray (PHI). Farriimaha codka iyo qoraalka ee ka imaanaya Isbitaalka Children's ma aha kuwo xogtoodu qarsoon tahay oo ammaankoodu sugan yahay. Adeegsiga habka xog qarintu wuxuu xaqiijiyaa in macluumaadku ahaado mid dhawrsan. Macluumaadka lagu gudbiyo farriimaha codka ama qoraalka waxaa laga yaabaa inaysan ahayn kuwo ammaankoodu sugan yahay, sidaa daraadeedna ay arki karaan dad kaleeto.
- **Ka laabasho.** Ogolaanshahaan ku saabsan in telefoonkayga gacanta la iigu soo diri karo farriimaha codka ama qoraalka ah wuxuu ahaanayaa mid dhaqangal ah ilaa inta aan ka ogeysiinayo Isbitaalka Carruurta ee Children's inaysan mar dambe farriimaha iigu soo dirin telefoonkayga gacanta. Isbitaalka Carruurta ee Children's ayaan ogaysiin doonaa go'aankayga ah inaan mar dambe farriimaha la iigu soo dirin telefoonkayga gacanta.
- **Isbadalka Lambarka Telefoonka.** Waxaan ogaysiin doonaa Isbitaalka Children's haddii lambarkayga telefoonka gacanta uu is badalo.

Magaca Bukaanka \_\_\_\_\_ Taariikhda \_\_\_\_\_

Saxiixa Mas'uulka: \_\_\_\_\_ Qor Magaca Mas'uulka: \_\_\_\_\_

Waxa aad u tahay Bukaanka: \_\_\_\_\_

Magaca Tarjubaanka (haddii la isticmaalay) \_\_\_\_\_

Mas'uulka oo ogolaansho afka ah siiyay si shaqaalaha isbitaalku ugu saxiixo (magaca shaqaalaha saxiixay/taariikhda/shaqadiisa) \_\_\_\_\_



PLACE PATIENT LABEL HERE